Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo: Waxbarashada joogtada ah ee lagama maarmaanka u ah bixiyeyaasha

Maarso 2026

Bilaabida

S1. Waa maxay waxbarashada joogtada ah?

Waxbarashada joogtada ah waa waajib shaqaalaha daryeelka guriga, kaaliyeyaasha daryeelka shakhsiga, iyo shaqaalaha taageerada shaqsiga.

Waa tababar joogto ah oo kaa caawinaya inaad la socoto hababka ugu wanaagsan ee shaqadaada. Waxay kaa caawinaysaa inaad sii xoojiso xirfadaha aad ku horumariso waqtigaaga shaqo.

Shuruudaha waxbarashada joogtada ah waxay dhaqan galayaan 31 Maarso, 2026. Eeg su’aasha toddoba (7) si aad u ogaato goorta aad u baahan tahay inaad dhameystirto waxbarashada joogtada ah.

S2. Imisa saacadood ayaan u baahanahay inaan qaato waxbarashada joogtada ah?

Waa inaad dhameystirtaa 12 saacadood oo waxbarashada joogtada ah laba (2) sano kasta.

S3. Waxaan ka shaqeeyaa in ka badan hal nooc oo bixiye ah. Imisa saacadood ayay tahay inaan qaato waxbarashada joogtada ah?

Waa inaad qaadataa guud ahaan 12 saacadood oo waxbarashada joogtada ah laba (2) sano kasta. Uma baahnid inaad qaadato ka badan 12 saacadood laba (2) sano kasta xitaa haddii aad ka shaqeyso in ka badan hal nooc oo bixiye ah.

Taariikhda ay ku egtahay waxbarashadaada joogtada ah waxay ku xirnaan doontaa lambarka bixiyaha ee aad haystay muddada ugu dheer.

S4. Waxaan horey uga qaatay koorsooyin waxbarasho joogto ah Carewell SEIU 503. Ma waa inaan dib u bilaabaa gebi ahaanba?

Maya. Haddii aad dhameysato koorsooyinka waxbarashada joogtada ah ka hor inta aan shuruuddu dhaqan gelin 31-ka Maarso, 2026, waxaad heli doontaa dhibco tababar.

Shahaadadaada waxbarashada joogtada ah waxay ansax ahaan doontaa ilaa shuruuddaada cusbooneysiinta xigta kadib wakhtiga kama dambaysta ah ee 31-ka Maarso, 2026.

- **Tusaale:** Haddii aad dhameystirto waxbarashada joogtada ah Oktoobar 2025, taariikhda cusbooneysiintaada xigta waa Abriil 2026. Waxaad buuxin doontaa shuruudda cusbooneysiintaada Abriil 2026. Marka xigta ee aad u baahan doonto inaad dhameystirto tababarka CE waa cusbooneysiintaada Abriil 2028.
- **Tusaale:** Waxaad dhameystirtay waxbarashada joogtada ah Diseembar 2024, taariikhda cusbooneysiinta xigta waa Janaayo 2025. Waxaad buuxisay shuruudda cusbooneysiintaada Janaayo 2027. Mar xigta ee aad u baahan doonto tababarka waxbarashada joogtada ah waa cusbooneysiintaada Janaayo 2029.

Waxaad weli u baahan doontaa inaad dhameystirto tababarka lagama maarmaanka ah markasta oo aad cusbooneysiiso lambarkaaga bixiyaha ka dib 31 Maarso, 2026.

S5. Waxaan ka haystaa shahaado Oregon Home Care Commission (OHCC). Ma wali waa inaan ka qaataa waxbarashada joogtada ah Carewell SEIU 503?

Maya. Haddii aad haysato wax ka mid ah shahaadooyinka OHCC ee hoose, waxaad ka nasanaysaa tababarka lagama maarmaanka ah ee Carewell SEIU 503 inta shahaadadaada ay shaqaynayso:

- Horumarinta Xirfadeed (PDC)

- Shaqaale Daryeelka Guriga ee Horumarsan ama Taageerada Shaqsiga ah
- Shaqaale Daryeelka Guriga oo Heer Sare ah ama Taageerada Shaqsiga ah
- Curyaanka Ku Tiirsan Hawo-siiyaha (Ventilator Dependency Quadriplegia, VDQ)
- Shaqaalaha Caafimaadka ee Dhaqameed

Haddii aad haysato shahaado OHCC, waxaad sidoo kale xaq u leedahay faa'iidada Carewell Kicks. Macluumaad ku saabsan faa'iidada Kicks waxaa lagu bixiyay su'aasha 11.

S6. Waxaan kaliya u shaqeeyaa xubinta qoyska. Maxaan uga baahanahay inaan qaato waxbarashada joogtada ah?

Xubnaha qoysku si fiican bay u yaqaanaan qofka ay taageeraan. Tababarka joogtada ah wuxuu caawiyaa in qofka la taageerayo helo daryeelka ugu fiican, iyadoon loo eegin qofka taageeraya.

Goorta la dhameystirayo waxbarashada joogtada ah

S7. Sideen ku ogaan karaa goorta ay tahay inaan dhameystiro dhammaan waxbarashada joogtada ah?

Taariikhda kama dambaysta ah ee dhameystirka waxbarashada joogtada ah waxay la mid tahay taariikhda uu dhacayo hubinta sooyaalka. Haddii aad leedahay dhowr lambar bixiye, taariikhda kama dambaysta ah waxay la mid noqon doontaa taariikhda uu dhacayo hubinta sooyaalka lambar bixiyaha ee aad haystay muddada ugu dheer.

- Shaqaalaha daryeelka guriga iyo kaaliyeyaasha daryeelka waxay taariikhdan ku arki karaan ogeysiisyada lacag-bixinta marka la siiyo mushaharkooda. Sidoo kale waxay ku jiri doontaa ogeysiisyada xusuusin ee ay ka helaan dowladdu 120, 90, iyo 60 maalmood ka hor inta aanu lambarkooda bixiyaha dhicin.
- Shaqaalaha taageerada shaqsiga waxay taariikhdan ka arki karaan eXPRS. Shaqaalaha taageerada shaqsiga waxay heli doonaan ogeysiisyo iimayl ah ka hor inta aanu lambarkooda bixiyaha dhicin.

Carewell SEIU 503 sidoo kale waxay horey kuu soo diri doontaa xusuusin si aad u ogaato in waqtiga kama dambaysta ah uu soo dhawaaday.

S8. Ma qaadan karaa koorsooyinka waxbarashada joogtada ah anigoo shaqeynaya?

Maya. Waa inaad qaadataa koorsooyinkaaga marka aadan shaqeynayn.

S9. Maxaa dhici doona haddii aanan dhameystirin waxbarashada joogtada ah waqtigeeda?

Waa inaad dhameystirtaa dhammaan tababarada lagama maarmaanka ah waqtigeeda si aad u sii haysato lambarkaaga bixiyaha oo aad ugu shaqeyso sidii bixiye. Waxaa dhici karta inaad lumiso lambarkaaga bixiyaha oo aad joojiso shaqada haddii aadan dhameystirin tababarkaaga lagama maarmaanka ah waqtigiisa.

Mushaharka iyo faa’iidooyinka waxbarashada joogtada ah

S10. Ma la igu siin doonaa lacag qaadashada koorsooyinka waxbarashada joogtada ah?

Haa. Waxaad heli doontaa gunno marka aad dhameystirto dhammaan 12-ka saacadood ee waxbarashada joogtada ah. Tani waxaa lagu bixiyaa heerkaaga mushaharka aasaasiga ah.

Marka aad dhameystirto dhammaan tababaradaada waxbarashada joogtada ah, waxaad heli doontaa iimayl ka imanaya Carewell Learning Portal oo ku baraya Routable, adeeg bixiye lacag bixin. Talaabooyinka lagu helo gunnadaada waxa lagu dari doonaa iimaylka. Gunnada waxaa lagu bixin doonaa wareejin toos ah ama jeeg.

S11. Ma jiraan faa’iidooyin kale oo la heli karo marka aan dhameystiro waxbarashada joogtada ah?

Haa. Marka aad dhameystirto dhammaan saacadaha waxbarashada joogtada ah, waxaad xaq u leedahay faa’iidada Carewell Kicks oo waxaad heli kartaa kabo iska caabbiya simbiriirixashada oo bilaash ah. Fadlan ogow haddii aad horey u heshay kabo Carewell Kicks, ma xaqiijin doontid kabo kale ilaa hal sano ka badan laga joogo markii aad soo dalbatay

kabaha hore. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Carewell Kicks halkan: www.carewellseiu503.org/carewellkicks/

Qaabka waxbarashada joogtada ah

S12. Yaa bixiya koorsooyinka waxbarashada joogtada ah?

Koorsooyinka waxbarashada joogtada ah waxaa bixiya Carewell SEIU 503.

Si aad isu diiwaangeliso koorsooyinka waxbarashada joogtada ah, gal boortalka waxbarashada Carewell SEIU 503: carewellseiu503portal.org/#/login

Haddii aadan arkin waxbarashada joogtada ah akoonkaaga markaad gasho, kala xiriir Carewell SEIU 503 Member Assistance Center wixii caawimaad ah 1-844-503-7348 (Isniin–Jimce, 8 subaxnimo – 6 galabnimo).

S13. Sideen u qaataa koorsooyinka waxbarashada joogtada ah?

Tababarada intooda badan waxaa laga heli karaa internetka. Qaar ka mid ah koorsooyinka waxaa lagu bixiyaa webinaaro toos ah oo onlayn ah. Webinaarada tooska ah waxaa la bixiya toddobaadka oo dhan, xitaa habeenada iyo dhammaadka usbuuca. Waa inaad horey isu diiwaangelisaa si aad uga qaybgasho koorsooyinkan.

Koorso lagama maarmaan ah oo lagu bixiyo fasalka tooska ah waa *Wacyiga Dhaqan.* Waa inaad si wanaagsan hore ugu iska diiwaangelisaa koorsadan ka hor taariikhda dhameystirka tababarkaaga si aad uga fogaato dib u dhac ku yimaada buuxinta shuruudaha cusbooneysiinta.

S14. Muddo intee le’eg ayay soconayaan koorsooyinka waxbarashada joogtada ah?

Koorsooyinka waxay u dhexeeyaan 15 daqiiqo ilaa laba (2) saacadood. Koorsooyinka intooda badan waxaa laga heli karaa 24 saac maalintii, 7 maalmood usbuucii. Waad bilaabi kartaa oo joojin kartaa tababarka mar kasta oo aad rabto.

Mawduucyada waxbarashada joogtada ah

S15. Waa maxay mawduucyada lagu daray waxbarashada joogtada ah?

Waxbarashada joogtada ah waxay ka kooban tahay afar (4) saacadood oo koorsooyin lagama maarmaan ah iyo siddeed (8) saacadood oo koorsooyin doorasho ah oo aad adigu dooran karto. Waxaad ka dooran kartaa koorsooyin doorasho oo kala duwan si aad u hesho tababarka ugu habboon baahiyahaaga iyo danahaaga.

Hal (1) saac ayaa lagu bixiyaa tababarka lagama maarmaanka ah ee ku saabsan:

- Xuduudaha xirfadeed
- Soo sheegidda xadgudubka iyo dayaca
- Khiyaamada Medicaid iyo Medicare

Waxaa sidoo kale jira saddex (3) saacadood oo tababar xirfadeed oo dhaqameed oo lagama maarmaan ah, oo ay ku jiraan:

- Wacyiga dhaqan (webinaar)
- Xirfadaha dhaqan

Waxaa jira dhowr doorasho oo koorsooyin doorasho ah si loo dhameystiro siddeeda (8) saacadood ee haray ee waxbarashada joogtada ah. Qaar ka mid ah doorashooyinka waxaa ka mid ah:

- Baadqabka cuntada
- Wax ka barashada ogaanshaha I/DD-ga caamka ah
- Hababka ugu wanaagsan ee nadaafadda guriga
- Qaadista iyo meeleynta
- Wareejinta iyo qalabka taageerada
- Maareynta walbahaarka ee bixiyeyaasha daryeelka
- Waa maxay aqoonsi?
- Waa maxay isdhaafsanaanta?
- Xidhashada iyo bixinta qalabka ilaalinta shaqsiga (PPE)
- Isticmaalka xad-dhaafka ah ee daawooyinka la qoro
- Erey-bixinta caafimaadka ee bixiyeyaasha daryeelka
- Nidaamyada jidhka 1 iyo 2

- La shaqeynta macaamiisha aan hadlin
- Bixinta adeegyo ku saleysan awoodaha qofka

Carewell badanaa waxay ku dartaa koorsooyin cusub buugga koorsooyinka. Si aad u hesho liiska ugu cusub ee koorsooyinka, booqo CarewellSEIU503.org/catalog.

Helida

S16. Maxaa dhici doona haddii aanan haysan laptop, kombiyuutar, tablet, ama smartphone, ama internetka?

Carewell SEIU 503 waxay bixisaa habab kale oo tababar lagu qaato kuwa aan haysan qalab ama adeeg internetka. Waxaad la xiriiri kartaa Carewell 1-844-503-7348 si aad wax badan uga ogaato.

S17. Maxaa dhacaya haddii aan u baahanahay qaabilaadda ADA si aan u qaato tababarka?

Carewell SEIU 503 waxay ka caawin kartaa qaabilaadaha ADA. Fadlan la xiriir iyaga 1-844-503-7348 wixii macluumaad dheeraad ah.

S18. Ma lagu bixiyaa koorsooyinka waxbarashada joogtada ah luqado kale?

Haa. Koorsooyinka waxaa lagu heli karaa luqado badan oo ay ku jiraan Carabi, Ingiriis, Shiine, Ruush, Isbaanish, iyo Fiitnaam. Qalabka turjuman iyo turjubaanada ayaa sidoo kale la heli karaa.

Dukumeentigaan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. La xiriir Guddiga Daryeelka Guriga Oregon ohcc@odhsoha.oregon.gov ama 877-624-6080. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.